



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Hadal Qoraal uu ka soo saaray Ergraygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya gudbinta loo gudbinayo Baarlamaanka Golaha Wasiiradda

Muqdisho, 09 Nofember 2012 – Ergraygga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Dr. Agostine P. Mahiga ayaa si aad ah u soo dhoweeyay gudbinta Golaha Wasiiradda Soomaaliyeed loogu gudbiyo Baarlamaanka berito oo ah 10 Nofember 2012.

Ergaygga Gaarka ah wuxuu ogsoonyahay in tiradda xukuumadani ay tahay tii oogu yareed ee ay Soomaaliya yeelato inta taariikhdeeda la ogyahay. Sidoo kale, Ergayggu wuxuu si gaar ah oogu faraxsanyahay in Xubnaha Golaha Wasiiradda ee muhiimka ah ee uu soo magacaabay Raiisul Wasaare Shirdoon ay Haweenka ku leeyihiin boqolkiiba 20%, taas oo ay ku jurto Jagadda brotokoolkeedu aadka u sareeyo ee ah Ku-xigeenka Raiisul Wasaaraha isla markaasna ah Wasiirka Arrimaha Dibadda.

“ hadaba waxaan uugu baaqayaa Baarlamaanka in uu si dhakhso leh oogu howlgalo ka hadalka arrintan uuna xaqiijiyo in Ummadda Soomaaliyeed ay yeelato Gole Wasiiro oo si buuxda loo ansixiyay. Danta Ummadda Soomaaliyeed waxay ku jirtaa in wadhadalku uu u dhaco si huffan oo loo dhanyahay isla markaasna iskaabaya. Waana in aan u howlgalnaa si dhakhso leh, ayuu yiri Ergaygga.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir Saraakiisha UNPOS u Qaabilsan Isgaarsiinta Guud
Nick Birnback, + 254 41 350 6855 (Office) or + 254 739 976 888 (Mobile)

Fadlan eeg rugta Internet-ka:

<http://www.unpos.unmissions.org>  @UNPOSomalia  unposomalia.tumblr.com  flickr.com/photos/unpos